

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Somaaliya.

Og: Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Og: Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobey.

Og: Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey.

Og: Guddoomiyaha Midowga Afrika (AU).

Og: Xoghayaha Guud ee Ururka Jamacadda Carabta.

Og: Dawladaha Xubnaha ka ah Urur Goboleedka IGAD.

Og: Safaaradaha Shisheeye ee ku sugaran Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

BAYAANKA LAASCAANOOD

Febraayo 5, 2023

Sida bulshada soomaaliyeed iyo Beesha Caalmkuba la socdeen, waxaa 15kii sannadood ee la soo dhaafey ka jirey deegaannada SSC-khatumo dhibaatooyin badan oo ka dhashey joogitaanka sharci-darrada ah ee maamulka Somaliland. Arrintaas oo keentey kacdoonka shacabka ee ku caan baxey “Kacdoonka Buluugga ah” ee ay dadku ku diidan yihiin in lagu khasbo gooni-goosad aysan dooneyn, xasuq isir safeyn ah, shirqollo lagu beegsanayo haldoorka deegaanka, la dagaalannka iyo curyaaminta dhaqaalaha deegaanka, ilaa la gaadhsiiyey heer hay’adaha caalamiga ah laga hor-joogsado degaannada SSC-khatumo.

Intaas waxaa dheer xadhiga, jidh-dilka, iyo cabudhinta joogtada ah ee lagu hayo bulshada SSC-khatumo ee aan ogoleyn kala goynta dalka.

Sababtaa darteed, waxaa magaalada Laascanood 28-01-2023 – 5-02-2023 shirweyne ay aayahooda uga tashanayaan isugu yimi dhammaan isimada, cuqaasha, culimada, aqoonyahanka, haweenka, dhalinyarada iyo qaybaha kala duwan ee

bulshada. Wada-hadal, wada-tashi iyo falanqayn qoto dheer ka bacdi, waxaa ka soo baxay go'aamadan hoos ku xusan.

1. Wuxuu caddaynaynaa in annaan sinaba uga mid ahayn Somaliland, wax heshiis ahna anaan kula galin kala go'aynta dalka Soomaaliya.
2. Degaannada SSC-Khatumo dad iyo dalba waxay ka mid yihiiin dhulwaynaha Jamhuuriyadda Federalka Somaaliya, waana astaan u taagan midnimada iyo wada-jirka ummadda Soomaaliyeed.
3. Shir-waynaha beelaha SSC-khatumo wuxuu caddaynayaa in deegaannada SSC-Khatumo lagu dhaqayo xeerarka iyo dastuurka Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya.
4. Tan iyo inta la dhamaystirayo aayo-ka-tashiga deegaannada SSC-Khatumo si waafaqsan qodobka 49aad ee dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Somaaliya, shirweynuhu wuxuu go'aansaday in deegaannada SSC-Khatumo toos u hoos tagto dawladda Federaalka si waafaqsan qodobka 48aad faqradiisa 2aad ee dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
5. Wuxuu caddaynaynaa in aanaan ahayn argagixiso, degaankayagana aanay joogin argagixiso, balse aannu nahay dadkii degaanka lahaa oo ay Somaliland si gardarra ah ugu soo duushay, isala markaana waxannu ballan qaadaynaa sugidda nabadgalyada degaankayaga. Sidoo kale waxaanu is kaashi buuxa oo amni la yeelanaynaa maamullada iyo deegaannada dariska ah.
6. Dadkii lagu laayay muddadii 15 sano ahayd ee maamulka Somaliland ka talinayey degaannada SSC-Khatumo, waxaanu u aqoon sanahay in uu ahaa xasuuq isir ku salaysan, waxaana masuul ka ah maamulka Somaliland, isla markaana waxaan caddaynaynaa in dilalkii qorshaysnaa ay la bilaabmeen imaatinkii Somaliland.

BAAQ

- A. Shirweynuhu wuxuu ugu baaqayaa maamulka beelaysan ee la magac baxay Somaliland in ay xushmayso rabitaanka iyo go'aannada dadka degaanka SSC-Khatumo ee ku salaysan nabadda iyo daris wanaagga, ayna kala baxdo ciidamadeeda ku sugaran deegaannada SSC-khatumo si shuruud la'aan ah.
- B. Wuxaan ugu baaqaynaa isimada, culimada, cuqaassha iyo dhammaan wax garadka reer Sheikh Isaxaaq in ay ka qayb qaataan sidii ay uga bixi lahaayeen ciidamada Somaliland deegaankayaga, loogana baaqsan lahaa colaad iyo cadaawad dabatheeraata, oo saamaysa dadka walaalaha ah ee deriska ah.
- C. Wuxaan ugu baaqaynaa Beesha caalamka iyo hay'adaha Xuquuqul Insaanaka in ay baadhitaan degdeg ah ku sameeyaan xadgudubyada maamulka Somaliland ka gaystay 15kii sannadood ee la soo dhaafay deegaannada SSC-khatumo.
- D. Shir-waynaha beelaha SSC-khatumo wuxuu ugu baaqayaa kana codsanaynaa dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Beesha Caalamka, inay hadda wixii ka danbeeya si toos ah ugala xidhiidhaan wixii khuseeya danaha SSC-Khatumo hoggaanka lagu doortay shirweynaha, maaddaama ay haystaan oggolaanshaha bulshada deegaannada SSC-Khatumo.

GUNAANAD

- I. Shirka waxaa lagu doortay gole hoggaan oo ka kooban 45 xubnood oo ah hoggaanka rasmiga ah ee arrimaha SSC-Khaatumo.
- II. Wuxaanu soo dhawaynaynaa wada hadal kasta oo nabadeed haddii Somaliland ciidamadeeda si buuxda u gala baxdo deegaanada SSC-Khaatumo.
- III. Qodobada ka soo baxay shirka Aaya-katashiga deegaannada SSC-khatumo waa qodobo la isku raacay, laguna midaysanyahay, waxaa wax lagaga beddeli karaa oo kaliya kulan ay u dhanyihiin dhammaan sexeexayaasha heshiiska oo ah isimada iyo cuqaasha beelaha SSC-Khatumo.

DHAMMAAD